

Degmooyin ka tirsan Viken ayaa ku sii jiri doona tallaabooyinka aageed

Gobolka Viken waxa jira degmooyin ay is-qaadsiinta cudurku weli ku badan tahay, islamarkaana degmooyinka dhexdooda ayaa aad ugu kala duwan heerka is-qaadsiinta.

Kaddib markii soo jeedinno uga yimaadeen Agaasinka Caafimaadka, Machadka Caafimaadka Dadweynaha iyo guddoomiyaha gobolka, waxa ay dawladdu go'aamisay in sagaal degmo oo ka tirsan Viken ay ku sii jiraan tallaabooyinka aageed heerka B. Toban degmooyin ayaa ka baxaya tallaabooyinka aageed laga bilaabo saqda dhexe, habeenka isniinta 10-ka May.

– Heerka is-qaadsiinta cudurku aad ayuu u kala duwan yahay Viken gudaheeda, waxaana weli jira dhowr degmooyin oo heerka is-qaadsiintu sarreeyo. Laga bilaabo isniinta waxa nidaamka tallaabooyinka aageed laga saraayaa toban degmooyin, halka sagaal kalena ay ku sii jirayaan tallaabooyinka adag muddo labo toddobaad, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Degmooyinka Bærum, Drammen, Lier, Lillestrøm, Lørenskog, Nordre Follo, Rælingen, Ullensaker iyo Ås waxa ay ku sii jirayaan tallaabooyinka heerka B ilaa iyo 21-ka May.

Degmooyinka Lillestrøm, Lørenskog iyo Rælingen waxa kale oo loo soo jeedinaya in ay sii wadaan tallaabooyinkii maxaliga ahaa la dhaqangeliyey laga bilaabo 6-dii May ee la waafajiyay nidaamka Oslo.

Degmooyinka Bærum, Drammen, Lier, Nordre Follo, Ullensaker iyo Ås waxa loo soo jeedinayaa in ay soo rogaan tallaabooyin maxali ah oo kale.

Asker, Enebakk, Fredrikstad, Frogn, Halden, Indre Østfold, Moss, Råde, Sarpsborg iyo Vestby waxa laga saarayaa nidaamka tallaabooyinka aageed laga bilaabo saqda dhexe, habeenka isniinta 10-ka May.

Arrintani waxa ay ka dhigan tahay in degmooyinkani laga bilaabo xilligaas ay hoos iman doonaan nidaamyada heerarka qaran ah ee mar kasta jira. Laakiin si kastaba waxa la soo jeedinayaa in degmooyinku ay eegaan in loo baahan karo in la soo rogo tallaabooyin maxali ah, ama in wax laga beddelo ama la xoojiyo tallaabooyin maxali ah oo hore u jiray.

Wasaaraddu way ogtahay in degmada Asker ay soo rogi doonto tallaabooyin maxali ah oo la xoojiyey laga bilaabo isniin 10-ka May.

Agaasinka Caafimaadka, Machadka Caafimaadka Dadweynaha, Guddoomiyaha Gobolka Oslo iyo Viken iyo degmooyinka ay khuseyso ayaa wadahaadallo ka yeeshay arrintan.

Dawladdu waxa ay go'aamisay in degmooyinkan soo socda ay ku sii jiraan tallaabooyinka heerka B (heer talaabo oo adag) ilaa iyo 21-ka May:

- Bærum
- Drammen
- Lier
- Lillestrøm
- Lørenskog
- Nordre Follo
- Rælingen
- Ullensaker
- Ås

Degmooyinkan soo socda ayaa ka baxaya nidaamka tallaabooyinka aageed laga bilaabo 10-ka May:

- Asker
- Enebakk
- Fredrikstad
- Frogn

- Halden
- Indre Østfold
- Moss
- Råde
- Sarpsborg
- Vestby

Waxa la qorshaynayaa in la qabto kulan cusub oo dhexmaraya guddoomiyaha gobolka iyo degmooyinka si loo qiimeeyo xaaladda Viken xilli u dhexeeya 18-ka iyo 20-ka May.

Faahfaahin ku saabsan tallaabooyinka aageed

Dawladdu waxa ay go'aamin kartaa nooca tallaabooyinka lagu soo rogayo degmo iyo degmooyinka ku xeeran marka ay lagama maarmaan u tahay in tallaabooyinka ka hortagga ah loo hirgeliyo si degdeg ah oo isuduwan si looga hortago faafidda cudurka.

Heerka tallaabooyinka ee loo dooranayo degmo waxa ay ku xidhan tahay sida ay xaaladda faafidda cudurku u daran tahay. Waxa la isticmaali karaa saddex heer oo tallaabooyin ah. Waa tallaabooyinka heerka A (heer aad u adag), tallaabooyinka heerka B (heer adag) iyo tallaabooyinka heerka C (heer xoogaa adag).

[Halkan ayaad ka arki kartaa tallaabooyinka kala duwan ee hoos imanaya heeerarka kala duwan](#)